DAWLADDA PUNTLAND

EE SOOMAALIYA

GOLAHA WAKIILADA

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

*Ref:*-XGGW/DPL/ 49 /2018 Garoowe, Arbaca Date:- 15/08 /2018

Ku: Madaxweynaha Dawladda Puntland Garoowe

Ujeeddo:- Ansixinta Lifaaqa 4-aad Dastuurka Dawladda Puntland

**Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-**

**MARKUU ARKAY:** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa **64-[aad]**.

**MARKUU ARKAY:-** Warbixintii Guddiga Doorashooyinka ku meel gaarka ee Puntland ay Golaha ka horjeediyeen kalfadhigii 41-aad, fadhigiisii 24 ee 14/08/2018.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Baahida loo qabo Doorasho ka dhacda Puntland Jan/2019.

**MARKUU ARKAY:** Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada DPL ee kalfadhiga 41-aad fadhigiisa 24-aad ee **14/08/2018**

**Wuxuu Guddoomiyey:-**

**Ansixinta Lifaaqa 4-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland.**

**Allaa Mahad Leh**

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

**Md. Axmed Cali Xaashi**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

Tell:- +252 90 7799977, Email: haashi7999@gmail.com Website:- www.puntlandparliament.net

Lifaaqa 4-aad ee Dastuurka Puntland.

**Golaha Wakiillada** isagoo ka duulaya warbixinta Guddiga Doorashooyinka ku meel gaarka ah ee Puntland ka horjeediyeen kalfadhiga 41-aad fadhigiisa 24-aad ee **14/08/2018,** taasoo muujisay in mudada ka hartay xilhaynta Golayaasha Dawladda Puntland aanay ku qabsoomi karin Doorashooyin toos ah (hal qof hal cod).

**Golaha Wakiillada** DPL isagoo cuskanaya Qodobada **7-aad, 60-aad, 64-aad iyo 68-aad** ee Dastuurka DPL wuxuu soo saaray Lifaaqa **4-aad** ee Dastuurka Puntland oo ka kooban qodobadan:-

1. In la soo xulo xubnihii Golaha Wakiillada ee bedeli lahaa Golaha hadda jira ka hor dhammaadka xil-hayntooda oo ku eg **31/12/2018.**
2. Xubnaha Golaha Wakiilladu waxay ku imaanayaan hab-beeleedkii lagu soo xuli jiray Golaha Wakiillada mudadii ay Puntland jirtay.
3. Shuruudaha ka mid noqoshada xubnaha Golaha Wakiillada ee la soo xulayo waa kuwa ku xusan **Qodobka 61-aad** ee Dastuurka Puntland.
4. Golaha Wakiillada ee cusub ee ku xusan qodobka 3-aad ee lifaaqan waxay iska dhex dooranayaan Guddoomiyaha iyo Labada ku xigeen, Sidoo kale waxay dooranayaan Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka Puntland **08/01/2019,** waxay kaloo fulinayaan waajibaadka kale ee dastuurku farayo.
5. Haddii xubin ama ka badan oo ka mid ah Golaha Wakiillada banayso/baneeyaan xilkooda ka hor dhammaadka mudada xil-hayntooda, waxaa soo bedelaysa beeshii soo xushay muddo 30 (soddan) maalmood gudahood ah, iyadoo la raacayo habka lagu soo xulay xubnaha Golaha.
6. Barnaamijka geedi-socodka dimuqraadiyeynta ee Puntand waxaa sii wadaya Guddiga Doorashooyinka ku meel gaarka ah ee Puntland ee hadda jira si aanay u dhicin hakad gala geedi-socodka dimuqraadiyeynta ee socda.
7. Golayaasha Deegaanka ee DPL waxaa lagu soo xulayaa hab la mid ah kan Baarlamaanka oo heer degmo ah, waxaana lagu dhaqayaa qodobada dastuurka ee khuseeya iyo xeerka Golayaasha deegaanka inta laga hirgelinayo Doorashada Golayaasha Deegaanka nidaamka Axsaabta badan ee soo socda.
8. Waxaa si ku meel gaarka ah loo laalay qawaaniinta iyo xeerarka ka hor-imanaya ama aan la socon Karin lifaaqan oo aysan suurta-gal ahayn in hadda la fuliyo.